

Talaalka cudurka karoona waa lacag la'aan wadankoo idil.

Mar dhow gobolka Kalmar waxaa soo gaari doona talaalka karoona. Waana lacag la'aan.

Hadda dhamaan waxaa la sugayaa in talaalku helo ogolaansho.

Talaalka laga isticmaali doono Yurub, waxaa marka hore si adag u hubin doona EU-da.

Ilaa laga hubiyo lama isticmaali doono.

Isla marka uu soo gaaro talaalka Iswiidhan, waxaa la bilaabi doona talaalidda, oo hadii xaga ra ridda, ama taraan isboortiga, iyo tijaabadu guuleystaan, talaalidda ugu horeysa waxay bilaabanaysaa gudaha bisha Janawari ee sanadka 2021-da.

Waxaa lagu bilaabayaa dadka aadka ugu baahan. Hay'adda caafimaadku waxay sameysay liis ay ku cadeynayso sida loo kala horeeyo.

1. Dadka dad'da ah ee degan guryaha gaarka, ama lagu xanaaneeyo guryahooda.
2. dadka u shaqeeya kooxda nambarka koowaad. Iyo weliba kuwa ka shaqeeya guryaha dadka da'da ah iyo kuwa ka shaqeeya caafimaadka.
3. Dadka la degan ama xiriir dhow la leh, kuwa da'da ah ee guryaha loogu adeego.

Kuwa deggan guryaha dadka da'da ah meeshoodaa lagu talaalayaa. Kuwa kalese waa inay ayagu dalbadaan talaalka.

Warbixino dheeraad ah ayaa soo bixi doona.

Marka dadka la hormariyey uu talaalkoodu dhamaado, ayaa kuwa kale is talaali doonaan. Hay'adda caafimaadku waxay rumaysan tahay in bartama xilliga dayrta 2021 ay dadkoo idil talaalmeen.

Daawada talaalku Iswiidhan waqtiyo kala duwan bay soo gaari doontaa. Kadib si toos ah baa waxaa loogu qaybinayaa gobolada. Waana ayaga kuwa ka mas'uulka ah talaalidda.

Talaalku waa lacag la'aan dadkoo idil.

Iswiidhan waxay soo gadatay noocyo kala duwan oo talaal ah.

Talaalku wuu kala yara duwan yahay.

Qaar waxay ku haboon yihiin dadka da'da ah, qaar kalena dadka cudurada qaarkood qaba.

Hada wax badan sidaas loogama oga, waxaa lagu guda jiraa in la ogaado.

Talaalku shirkado kala duwan baa soo saaray oo uu ka imanayaa.

Dheeraad

Hadii qof qoyska ka mid ahi xanuunsanyahay, waa in dhamaan qoysku guriga joogaan.

Hadii qof qoyska ka mid ahi iska helo cudurka (covid-19) waa in dadka la deggan dhamaantood guriga ku ekaadaan ayagana.

Qofka isagu joogay guriga laakiin aan cudurka qabin, hadaanu waxba isku arkin todoba maalmood ka dib, shaqadiisii ama iskuulkiisii wuu tegi karaa. Kan cudurka iska helayse waa in uu jawaab helaa. Xataa caruurta dhigata dugsiyada xanaanada ama dugsiyada caadiga ah waa inay guriga joogaan.